



# Badbaadi Wales Jiilaalkan



## Macluumaad karoonne fayras oo muhiima

Waa inaan dhammaanteen joojinnaa  
fiditaanka Karoonne fayras ee Wales.

## Sidaad naftaada iyo qoyskaaga u badbadinayso



### FARAHA SI JOOGTO AH U DHAQ

Khaasatan haddaad soo  
dukaamaysatay, alaab qaadday  
ama aad cunto qaban doonto.




### KU XIRO WAJIGA MAASKARO

Halkii looga baahdo



### IS-GO'DOOMI

Gurijga joog haddii adiga  
ama qof guriga kula deggan  
astaamo leeyahay, amase  
haddii uu sidaas kaa dalbado  
dabagale cudur-qaade.



### ILIAALI KALA DURUGGA BULSHO

U jirso laba mitir dadka kale ee  
aan ku jirin qoyskaaga fidsan.



### KA WARHAY ASTAAMAHA

Astaamaha ugu waawayn ee  
karoonne fayrasku waa heekrul sare,  
qufac cusub oo joogto ah, isbeddel  
ama lumis ku timaada urta ama  
dhadhanka.

### IS BAADH

Wac 119 ama ama  
ballan baadhiseed  
onlayn ka qabso

qabso Isla markiiba haddii aad  
leedahay astaamo - xattaa  
hadii ay sahlan yihiin.




### CAAWI QAADIS DABA GALAYAASHA

Qolyaha daba gala dadka cudurka  
halista ugu jiraa ayaa kula soo hadlaya oo  
kaala talinaya waxaad samayn lahayd  
haddaad u dhowaatay qof cudurka  
qaba. Waxay kaa soo wacayaan oo keliya  
**02921 961133**.

### YAREE U DHOWANSHAHAAGA DADKA KALE

Si taxaddar leh uga feker meeshaad aadayso  
cidaad la kulmayso. Hadba inta meelood  
ee aad booqato iyo tirada dadka aad  
la kulanto, gaar ahaan kuwaad meel xiran  
kula kulanto, ayuu le'ekaanayaa jaaniskaad  
cudurka ku qaadeyso uguna gudbinayso dadka kale.



### OO RAADSO APP-KA NHS COVID-19

Waa hab fudud oo aad ku  
ogaan karto inaad khatar  
ugu jirto karoonne fayras. Kala  
soo deg App Store-ka ama  
Google Play.

### FAYO-QABKAAGU

Waxaynu maraynaa waqti adag. Hadda way markay ugu muhiimsanayd  
ilaashashada caafimaadka maskaxeed. Waxaad taageero iyo talo bilaasha  
ka heli kartaa adoo booqanaya [www.callhelpline.org.uk](http://www.callhelpline.org.uk), ama wacaya  
**0800 132 737** ama qoraal ahaan ugu diraya: **CAAWIMO** lambarka **81066**.

### NHS WELI WAA KUU DIYAAR - NAGA CAAWI INAAN KU CAAWINO

Qaabkaad u helayso adeegyada NHS waxa laga yaabaa inay jiilaalkan  
duwanaato balse weli waa ku diyaar markaad u baahato. Ka caawi  
NHS ilaalinta ballamaha, iyo inay adeegii saxda ahaa u adeegsadaan  
jirradaada iyo dhaawacaaga.

Hadi aad u baahato caawimo balse aanay xaalad degdeg ah ahayn, booqo  
<https://111.wales.nhs.uk>. Taas beddelkeed wac **111** si aad u hesho talo ama la  
xiriir dhakhtarkaaga, am farmeesi, dhakhtar ilkood ama indhood.

Macluumaadkii iyo talooyinkii u dambeeyay ee ku  
saabsanaa karone fayras si aad u hesho, fadlan

Websaydka Dawladda Wales

[www.gov.wales/coronavirus](http://www.gov.wales/coronavirus)

Warqaddani noocyo kala duwan baa lagugu siinayaa markaad dalbato:  
customerhelp@gov.wales 0300 0604400



Llywodraeth Cymru  
Welsh Government

## Fariin ka timi Wasiirka Koobaad ee Wales

2020 wuxu dhammaanteen ku ahaa sannad dheer oo adag.  
Karoone fayras ayaa hadh madoow nolosheena oo dhan saaray,  
welina ma muuqdo dhammaadkii cudurkan safmareenka ah.

Haddaynu dhammaan is diyaarino waxaynu beddeli karnaa dariiqa  
cudurkani qaadayo.

Sannadkan, waxaanu qof kasta ka dalbanay inuu hawlo qayrulcaadi  
ah sameeyo, oo huritaan yaableh sameeyo, si aan isu wada  
badbaadino.

Waxaan idinka dalbanayaa inaad waxaas oo dhan sii waddaan.

Waxani waa fayras, ku kobca isu dhawaanshaha dadka. Haddii aynu  
rabno inaan xakamayno fayraska, waa inaan qaadistiisa yareynaa.

Markasta oo aan qof la kulano, waxaan khatar ugu jirnaa inaan  
cudurka qaadno ama gudbino.

Inta Kirismasku soo socdo, fadlan si taxaddar leh uga feker  
meeshaad aadayso, waxaad sameynayso iyo ciddaad arkayso.

Tani waxay kaa caawinaysaa badbaadinta naftaada, qoyskaaga  
iyo asxaabataada.

## Wadajir baan Wales ku Badbaadin Karnaa

Mahadsanid



Mark Drakeford

Mark Drakeford MS,  
Wasiirka Koobaad ee Wales